

Af Soomaali

Warar ku saabsan Rugta Kutubta ee Biritain

Maxaan samaynaa?

Rugta Kutubta ee Biritain waa rungtu kutubta qaranka ee wadankan Boqortooyada Midowday. Waxaanu ururinaynay/ kaydinaaynay ilaa 250 sanadood, waxana aanu nuqul ka helnaa wax kasta oo lagu daabaco Biritain iyo Ireland – waxaba aad oran kartaa waxaanu kaydinaa waax weyn oo kamida xusuusta wadanka. Waxa kale oo aanu soo iibsanaa daabacaadaha muhiimka ah ee kasoo baxa aduunka dacadadiisa, waxana kaydinta ku jira badi luqadaha muhiimka ah.

Rugta Kutubta ee Biritain waa xarun booqasho oo muhiima. Xaruntanaga uugu muhiimsan ee ku taala St Pancras waa masaafad cajaa'iba oo qani ah, waxana ay furan tahay todobada casho ee asbuuca. Qof walbana waa u furan tahay in ay soo booqdaan dukaankanaga, maqaaxida/hudheelka iyo café-ga. Waxa kale oo lagu qabtaa bandhigyo iyo xaflado nashadaad leh. Waxa kale oo jira carwooyin (gallery) bilaasha oo furan maalin walba laguna soo bandhigo kaydka aanu heyno. Faahfaahin dheeraada oo ku saabsan Bandhigyada iyo Xalfadaha ka eeg warsidahanaga ama www.bl.uk

Waxaanu kaydinaa qaniimadaha sida *Magna Carta*, hadalkii maxkamadii lasoo taagay Nelson Mandela, buug qoraaladii Leonardo da Vinci iyo qoraaladii daabacada ka-hore ee 'Beatles'. Dadka ayaa aduunka oo dhan uuga kala yimaada si ay u arkaan dukumantiyadan taariikhiga ah iyo dhigaalada xurmaysan ee yaala bandhigyada, iyo in ay darsaan cilmi baaritaanada aanu kaydino ee yaala Qolalka Akhriska.

Yaa isticmaali kara Rugta Kutubta?

Qof walba waa uu soo booqan karaa rungtu kutubta si ay u arkaan bandhigyada iyo in ay kasoo qeyb galaan xafladaha dad-weynaha. Laakiin hadii aad rabto in aad akhrido kaydka yaala Qolalka Akhrinta waxa aad u baahan tahay in aad is-diiwaangaliso oo aad hesho Kaadhka Akhristaha (Reader Pass). Fadlan ogsoonow in gelitaanka Qolalka Akhrinta iyo inta aad joogi kartaa waxay ku xiran tahay baahida cilmi-baaristaada. Cadaadiska dalabka adeeganaga awgii mar walba kuuguma balan qaadi karno in aad geli karto. Kaadhka Akhristaha waxa sharuud u ah baahida aad u qabto in aad aragto waxa gaarka ah ee aad uuga baahan tahay kaydkanaga. Waxaa suurto-gala in rugaha-kutubta ee kale ama xarumo kale ay ku haboon/ kafayn karaan waxa aad raadinayso, shaqaalaha ayaana kaa siin doona talo.

Maxaan u baahanahay kahor inta aanan isu-diwaan galin kaadhka?

Rugta Kutubta ee Biritain waa ka duwan tahay rugaha kutubta ee kale ee dadweynaha ama jaamacadaha:

- Kaliya kutubta tix-raaca iyo kuwa sayniska iyo ganacsiga ayaa laga heli karaa khaanado furan oo ku yaal Qolalka Akhriska.
- Badi kutubta ku kaydsan rugta kutubta waxaa lagu kaydiyaa bakhaar. Caadi ahaan mudada kutub laguugu diyaarin karaa waxa ay qaadataa 70 daqiiqadood hadii kaydku yaalo (dhismaha dhexdiisa) ama 48+ saacadood (meel dhismaha ka baxsan) waxana ay ku xiran tahay halka lagu kaydiyo.
- Buugta dhismaha dhextaala waa in la codsadaa inta ka horaysa 16.00 si maalintaa laguugu diyaariyo.
- Ka hor inta aadan isu-diwaan galin Kaadhka Akhriska, waxaa sahlan in aad kasii baarto shabakada Rugta Kutubta ee www.bl.uk si aad u sii hubiso in aanu hayno waxa aad u baahan tahay; xasuusnow in aad soo qaadato tilmaamaha kutubka aad u baahan tahay.
- Rugta Kutubtu nuqulo badan kama kaydiso kutubta caadiga ah, sida caadiga ahna kuma haboona laylisyada jaamacadaha.
- Sida caadiga ah uuma ogolaano in ay isticmaalaan dadka ka yar 18 sano, hadii kale waa in ay jiraan baahi gaara oo aanay ka heli karin rugaha kutubta ee kale. Ka eeg www.bl.uk faahfaahin dheeraad ah.
- Kamana amaanaysan kartid kutub Qolalka Akhriska.

Sidee loo helaa/ diiwaan galiyaa Kaadhka Akhriska

Kaalay goobta Diiwaangalinta Akhristayaasha ee ku taala Dabaqa Kore ee St Pancras, si aad u buuxiso foomka codsiga oo ku jira Kombutarka. Waxaana fiican in aad soo qaadato wax kasta oo taageeraya codsigaaga tus: kaadh ganacsi, kaadhka xubinimada xirfadlaha, iyo tilmaamaha kutubka aad rabto in aad aragto.

Waana in aad soo qaadato aqoonsi saxeexaagu ku dhigan yahay iyo wax cadaynaya cinwaanka guriga aad ku nooshahay.

Kaadhka lagu siiyo waxa aad isticmaali kartaa mudo u dhaxaysa hal bil ilaa sadex sanadood, taasi oo ku xiran baahidaada. Cilmi-baarayaasha shaqsiyeed, sida caadiga ah ma siino kaadh ka badan ilaa bil, hadii aanay jirin baahi gaar ah oo kale. Kaadhka Akhristayaasha waxaa sharuud u ah in la raaco Sharuudaha Isticmaalka Rugta Kutubta; waxaana nuqul laga heli karaa Diiwaanka Akhristayaasha ama shabakadanaga. Waxana aad ogaataa hadii aadan u hogaansamin Sharuudaha Isticmaalka waxaa laga yabaa in la hakiyo Kaadhka Akhristaha ee lagu siiyay.

- **Aqoonsiga iyo cadaymaha cinwaanka ee loo baahan yahay**

Hadii aad rabto in aad isku diiwaangaliso Akhriste, ama cusboonaysiiso ama badasho Kaadhka Akhristaha waxaa sharuud ah in aad keento **laba** nooc oo aqoonsi ah; mid waa in uu ku yaalo saxeexaagu, midna cadaynayaa cinwaanka gurigaaga. Waana in ay noqdaan dukumantiyo **asal ah** mana aqbalno kuwa koobiga a, fax-ka ah, internet-ka ama laan laga soo daabacday.

Waxaad ogsoonaataa in waraaqaha biilasha, qoraalada bangiga, qoraalada kaadhahka dayntu, Qoraalada Waaxda Cashuuraadka, buugta hawl-gabka/ gunooyinka/gunada qoysku ama mushahar bixintu **waa in aan taariikhdoodu ka fogayn sadex bilood.**

Mana siin doono Kaadhka Akhristaha ilaa la keeno laba nooc oo aqoonsi ah. – qofna kama reebna. Sharuudahan aqoosiga wax waa laga badali karaa, hadii aadan hubin waxa lagaaga baahan yahay fadlan la xiriir reader-registration@bl.uk. Foomamka aqoosiga waa kuwan:

Cadaynta cinwaanka guriga. Waxana aad u baahan tahay in aad keento mid kamida kuwan oo magacaaga iyo cinwaankaagu ku qoran yahay.	+	Cadaynta Aqoonsigaaga (saxeexna leh). Waxana aad u baahan tahay in aad keento mid kamida kuwan oo saxeexaaguna ku qoran yahay.
Biilasha (Gas-ka, Korontada, Telefoonka, Biyaha) Qoraalada Bangiyada (daabacada online-ka/ama laamaha bangiyada lama ogola) Qoraalada Kaadhahka Daynta Biilasha Cashuurta Degmada/Buuga Ijaarka Degmada. Waaxda Cashuuraha Buuga Gunada Hawl-gabka Gunooyinka/Gunada Qoyska Basborts (oo cinwaanku si rasmi ah uugu qoran yahay)* Kaadhka Aqoonsiga (National Identity Card) oo cinwaansan* Liisanka Baabuurta cinwaansan* Sharciga degnaanta ee Wasaarada Arimaha Gudaha Cadayn Jaamacadeed ee degenaanshaha Hoyga (oo leh shaanbada iyo saxeexa jaamacada) Liisanka TV-ga Liisanka Qoryaha Diiwaanka Caymiska Guryaha Warqadada Mushaharka (oo cinwaanka shaqaalaha iyo loo shaqeeyuhu ku dhigan yahay)		Dal-kugal Baasboor* Liisanka Baabuurta* Kaadhka Bangiga Kaakhka Daynta Kaadhka Aqoonsiga Qaranka* Kaadhka Booliiska/ Cashuuraha/ Was. Arimaha Gudaha. Liisanka Bada/ Cir Mareenka

Khariidada, Qoraalada hore	17.00	17.00	17.00	17.00	17.00	17.00	
----------------------------------	-------	-------	-------	-------	-------	-------	--

Wakhtiyada ay furan yihiin Bandhigyada iyo Dukaanku:

Isniin	Salaso	Arbac	Kham	Jimce	Sabti	Axad & Fasaxa Dadweynaha ee Ingiriiska
09.30	09.30	09.30	09.30	09.30	09.30	11.00
-	-	-	-	-	-	-
18.00	20.00	18.00	18.00	18.00	17.00	17.00

Dhamaan wakhtiyada kor ku xusani waa kuwa UK.

Tilmaanta aan nagu heli karto

Tareenka

Tareenka kore oo uugu dhawi waa St Pancras International, King's Cross iyo Euston. maxadada tareenka hoose ee uugu dhawi waa 'King's Cross St Pancras, Euston iyo Euston Square.

Bus-ka

dhismaha.

Busas-ka maraa waa 10, 30, 73, 91, 390 iyo 476 oo dhaafa

Gaari/Mooto/Baaskiilad

Barxadaha baabuurta ee uugu dhawi waxay ku yalaan dariiqa 'Marchmont Street iyo Judd Street. Barxado mitir leh waxa aad ka heli kartaa Ossulton Street. Waxaana ku yaala barxado bushkuleeti oo dadan oo ku yaala barxadanaga Piazza.

www.bl.uk

T +44 (0)843 208 1144